

# Foomka xallinta saxiixa

U isticmaal foomkaan oo keliya:

- Saxiixa Iskuma Eka

Office use only:

VID: \_\_\_\_\_

BID: \_\_\_\_\_

## 1. Akhri bayaanka warqadda codbixinta iyo dhaarta diiwaan gelinta codbixiyaha

### Bayaanka warqadda codbixinta

Waxaan ku dhaaranayaa ama aan xaqijinayaa, anigoo ogsoon in dhaar beeneedu ay ganaax tahay, in aan ahay: Muwaadin Mareykan ah; degane ku nool gobolka Washington oona buuxiya shuruudaha codbixinta ee uu farayo sharciga gobolka; ugu yaraan ah 18 sanno jir maalinta ay doorashada dhacayso, ama ah 17 sanno jir xilliga ay dhacayso doorashada hordhaca iyo 18 sanno jir ah marka la gaaro maalinta doorashada guud ee dhacda bisha Nofeembar; ka codbixinaya doorashadaan hal mar keliya, oo aan ka codeynin xukun kale oo ka tirsan dalka Mareykanka; in aanan laygu xukumin xukun dambi-weyn ah oo aan laygu hayn xabsi guud oo hoos taga xukunka Waaxda Asluubta ee gobolka Washington ama aanan iminka xabsi ugu jirin xukun dambi-weyn oo federaal ah ama mid ka dhacay gobolka Washington dibadiisa; in aanan layga mamnuucin codbixinta amar maxkamad awgeed; iyo waxaan ogsoonahay in saxiixa been-abuurku uu yahay sharci daro ama in qof kale loo codbixiyso iyo isku day codbixin iyadoo lagaa mamnuucay, isku day codbixin in ka badan hal mar, ama in si been-abuur ah loo saxiixo bayaankan waa dambi-weyn oo lagu mutaysan karo xukun xabsiga ugu badan oo ah ilaa iyo shan sanno, ganaaxa ugu badan oo gaaraya ilaa iyo \$10,000, ama labadaba.

### Dhaarta codbixiyaha

Waxaan caddeynayaa in xaqiiooyinka ku qoran foomkan diiwaan gelinta codbixiyaha ay run yihiin. Waxaan ahay muwaadin Mareykan ah, waxaan ahay degane ku nool gobolka Washington, iyo waxaan ahay ugu yaraan lix iyo tobantir. Laygama mamnuucin codbixinta amar maxkamad awgeed, iyo in aanan laygu haynin xabsi guud oo hoos taga xukunka Waaxda Asluubta ee gobolka Washington xukun dambi-weyn awgeed, iyo aanan iminka xabsi ugu jirin xukun dambi-weyn oo federaal ah ama mid ka dhacay gobolka Washington dibadiisa.

## 2. Buuxi macluumaadkaaga codbixiyaha (Loo baahan yahay)

Magaca

(fadlan qor/daabac): \_\_\_\_\_

Taariikhda dhalashada

(bisha/maalinta/sannadka): \_\_\_\_\_ / \_\_\_\_\_ / \_\_\_\_\_

## 3a. Meesha hoose saxiix kuna qor taariikhda

Saxiixiddaada halka hoose iyo soo celinta dokumentigaan waxaad xaqijinaysaa inaad ahayd qofka ku codeeyay warqadda codbixinta. Dhammaan saxiixyada hoos ku qoran waxaa lagu dari doonaa diiwaanka diiwaan gelinta codbixiyaha si loola barbar dhigo saxiixaaga doorashooyinka mustaqbalka. Bixinta noocyoo kala duwan oo saxiixaaga ah wuxuu caawini karaa sidii mustaqbalka looga fogaan lahaa arrimo kuwaan oo kale la mid ah.

X \_\_\_\_\_

Taariikhda Maanta

\_\_\_\_\_ / \_\_\_\_\_ / \_\_\_\_\_

X \_\_\_\_\_

Taariikhda Maanta

\_\_\_\_\_ / \_\_\_\_\_ / \_\_\_\_\_

Haddii aadan awoodin inaad saxiixaaga qorto, calaamad ku samee aaggaa saxiixa ee kore. Markaad calaamadnayso waa in laba qof oo markhaati ah ay goob joog yihiin oo iyagana saxiixa halka hoose. Ma isticmaali kartid awoodda qareenka si aad qof kale ugu saxiido.

saxiixa markhaatiga 1aad

saxiixa markhaatiga 2aad

## 3b. Ama bixi hab kale oo lagu xaqijiyo aqoonsigaaga (ikhtiyaar)

Lambarka leesanka darawalnimada, ruqsadda darawalnimada, ama ID-ga

gobolka: \_\_\_\_\_ 4-ta Lambar Ugu Dambeeya ee SSN: \_\_\_\_\_

Ka ee g dhinaca kale ee boggan fursado kale oo dheeraad ah eeaad ku xaqijin karto aqoonsigaaga.

## 4. Bixi macluumaadkaaga xiriirka (ikhtiyaar)

Fadlan na sii macluumaadkaaga xiriirka. Macluumaadkani maaha mid dadweynaha ay arki karaan, waxa keliya oo isticmaali kara xafiiskeena si uu kula soo xiriiro haddii ay jiraan su'aalo ku saabsan diiwaan gelintaada codbixiyaha ama warqaddaada codbixinta.

Ciwaanka iimeelka

Taleefan

Waa jeelaan lahaa in aan helo ogeysiis qoraal taleefan iyo iimeel ah oo ku saabsan xaaladda warqaddayda codbixinta ee doorashooyinka mustaqbalka.

## Hababka lagu xalliyo xujaynta saxiixaaga

### Buuxi foomka ku yaal dhinaca kale ee boggan. Si aad u loo xalliso xujaynta saxiixaaga:

- Saxiixa foomkan waa inuu u dhigma saxiixa ku qoran bakhshaddaada warqadda codbixinta, AMA
- Bixi afarta lambar ugu dambeeya ee Sooshiyaal Sekuuriti Lambarkaaga, AMA
- Bixi Lambarka leesankaaga darawalnimada ee Gobolka Washington oo buuxa, lambarka ruqsadda darawalnimada ama lambarka kaarka aqoonsiga gobolka, AMA
- Bixi hal koobi oo ah kuwan soo socda:
  - aqoonsi sawir leh
  - Kaarka is diiwaan gelinta oo ansax ah ee qabiil ku nool Washington oo ay dowladda federaalka aqoonsan tahay;
  - koobi hadda jira ee biilka isticmaalidda biyaha, korontada, ama gaaska ama warqadda bayaanka koontada bangiga ee hadda jirta;
  - koobbiga jeegga dowladda ee hadda;
  - koobbiga jeegga mushaharka ee hadda jira, ama dokumenti dowladeed (oo aan ahayn kaarka is diiwaan gelinta codbixiyaha) oo muujinaaya magaca codbixiyaha IYO ciwaanka.

### Sida aad dib ugu soo celin karto foomka xallinta saxiixaaga:

Waa inaan helnaa foomkan oo la soo buuxiyay ka hor inta aan la gaarin wakhtiga kama dambeysta ah ee la tirinaayo warqaddaada codbixinta. Sida aad dib ugu soo celin karto foomka:

- limeel ku dir [signature.resolution@kingcounty.gov](mailto:signature.resolution@kingcounty.gov) - qaad sawir fasiix ah ama foomka oo dhan iskaan-garee.
- Boostada ku dir adigoo isticmaalaya bakhshadda soo celinta ee la socota - istaambo boosto looma baahna.
- Shakhsii ahaan u keen Waaxda Doorashooyinka Degmada King – 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057
- Ka gudub foomka xaashida ee oonleenka ku xalli xujaynta saxiixaaga halka [www.kce.wiki/SigCure](http://www.kce.wiki/SigCure).

### Raad-raac warqaddaada codbixinta si aad u hubiso in la tiriyo!

Iskaan-garee QR koodka ku qoran dhinaca midig ama booqo barta [kingcounty.gov/elections/ballot-tracker](http://kingcounty.gov/elections/ballot-tracker) si aad warqaddaada codbixinta uga raad-raacdoo oonleenka.



Waxaan kugula talinaynaa inaad hubiso raad-raaca warqadda codbixinta ilaa aad ka aragto in warqaddaada codbixinta la tiriay.

You can receive your ballot and voting materials in Chinese, Korean, Russian, Somali, Spanish, and Vietnamese. Sign up at [kce.wiki/languages](http://kce.wiki/languages) today!

您可以接收中文、韓文、俄文、索馬里文、西班牙文和越南文的選票及投票材料。立即在 [kce.wiki/lang-CH](http://kce.wiki/lang-CH) 登記！

귀하의 투표용지와 투표자료를 중국어, 한국어, 러시아어, 소말리어, 스페인어 그리고 베트남어로 받으실 수 있습니다. 오늘 [kce.wiki/lang-KO](http://kce.wiki/lang-KO)에서 등록하십시오!

Вы можете получить бюллетень и материалы для голосования на китайском, корейском, русском, сомалийском, испанском и вьетнамском. Зарегистрируйтесь на [kce.wiki/lang-ru](http://kce.wiki/lang-ru) сегодня!

Waxaad heli kartaa warqaddaada codbixinta iyo agabka codeynnta oo ku qoran afka Shiinaha, Kuuriyaanka, Ruushka, Soomaaliga, Isbaanishka, iyo Fiyatnamiiska. Iska diiwaan gel halka [kce.wiki/lang-so](http://kce.wiki/lang-so) maanta!

Puede recibir su boleta y otros materiales de votación en chino, coreano, ruso, somalí, español y vietnamita. ¡Regístrate en [kce.wiki/lang-ES](http://kce.wiki/lang-ES) hoy mismo!

Quý vị có thể nhận lá phiếu và tài liệu bầu cử bằng tiếng Trung Quốc, tiếng Hàn Quốc, tiếng Nga, tiếng Somali, tiếng Tây Ban Nha, và tiếng Việt. Đăng ký tại [kce.wiki/lang-VI](http://kce.wiki/lang-VI) ngay hôm nay!